

Tilmaanta Gafuur xirka Marada ee kasoo baxday Washington State Department of Health

COVID-19 ayaa ku faafaaya gobalka Washington. Dadka qaba cudurka COVID-19 ayaa faafin kara fayraska xataa markaysan lahayn astaamaha cudurka ama aysan aqoon inay jiran yihiin.

Washington State Department of Health (Waaxda Gobalka Washington uqaabilsan Caafimaadka) ayaa kaa doonaysa inaad xirato gafuur xir maro ah marka aadan lix fiit (ama laba mitir) ka fogaan karin dadka kale. Waa inaad xirataa gafuur xir markaad gudaha ugu jirto xarumaha dadwaynaha sida dukaanka adeegga, farmashiyaha, dukaanka hardware-ka, xarunta caafimaadka, iyo goobaha kale. Waa inaad sidoo kale ku xirataa gafuur xirka banaanka haddii aadan lix fiit (ama laba mitir) ka fogaan karin dadka kale mar kasta.

[Centers for Disease Control and Prevention \(CDC, Xarumaha Kahortaga iyo Xakamaynta Cudurka\)](#) ayaa sidoo kale ku talinaysa inaad xirato gafuur xir maro ah. Xirashada gafuur xirka marada ah ayaa gacan ka gaysan karta ka hortaga ku faafida COVID-19 dadka kale. Markaad xirato gafuur xirka, waxaad gacan ka gaysanaysaa difaaca dadka kale ee kuu dhaw.

Xirashada gafuur xirka marada ah kaliya kama hortagayso faafida COVID-19. Waa inaad wali lix fiit (ama laba mitir) u jirsataa dadka kale ee aan ahayn kuwa guriga kula dagan markaad xiran tahay gafuur xirka, aadna si joogto ah ugu farxalataa saabuun iyo biyo ama aad adeegsataa nadiifiyaha faraha ee aalkolada ka samaysan.

Tilmaan

Si aad gacan uga gaysato ka difaacida naftaada iyo dadka kale cudurka COVID-19:

- Xiro gafuur xir markaad dadka dhex joogto.
- Si joogto ah gacmaha ugu dhaq saabuun iyo biyo
- Farxalo kahor intaadan taaban indhahaaga, sanko, iyo afka
- Farxalo kahor iyo kadib markaad gashato, iska bixiso, ama aad fidiso gafuur xirkaaga
- Ka fogoow lix fiit (ama laba mitir) dadka kale ee aan kula daganayn guriga
- Ka fogoow dadka jiran
- Guriga joog markaad xanuunsan tahay

SU'AALAHADA BADANAA NALA WAYDIIYO (FAQ)

Waa maxay gafuur xirka marada ah?

Gafuur xirka marada ah waa maro jilicsan oo daboolaysa sankoaga iyo afkaaga. Waxay noqon kartaa:

- Maaskaro la tolay oo leh arag ama qoolal aad ka guntayso jeegada ama galaaya gadaashada dhagahaaga
- Lakabyo dhawr ah oo maro jilicsan ka samaysan oo lagu xiro madaxa qofka

- Maro laga sameeyay qaybaha kaladuwan ee alaabaha sida suufka, gacanta shaarka, ama baftada
- Maro ay samaysay warshad ama guriga lagu tolal

Haddii aad doonayso inaad tolato gafuur xirkaaga marada (maaskarada) fiiri: [Sida loo Tosho Maaskaraati](#)

Fadlan ha adeegsan shabaqyada N95 ama maaskaraatiga qaliinka oo aad gafuurka ku xiranayso. Waxaa loogu baahan yahay shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha gurmada degdega ah.

Gafuur xirka marada ah ma joojinaysaa faafinta COVID-19?

Gafuur xirka marada ah ayaa yarayn karta ku faafinta unugyada fayraska hawada marka qofka qaba COVID-19 uu hadlo, qufaco, ama hindhiso. Waxaad gacan ka gaysan kartaa ka hortaga faafida COVID-19 marka aad xirato gafuur xirka marada ah, xataa haddii aadan aaminsanayn inaad qabto COVID-19.

Yay tahay inuu xirto gafuur xirka marada?

Dadka intooda badan waa inay xidhaan gafuur xirka marada ah markay dadka kale la joogaan. Xiro gafuur xirka markaad joogto gudaha xarumaha bulshada marka laga reebo inaad wax cunayso, iyo banaanka marka aadan dadka kale ka fogaan karin lix fiit (ama laba mitir) mar kasta.

Dadka qaar waa inaysan xiran gafuur xirka marada ah:

- Ilmaha kayar laba sano jirka
- Dadka qaba naafada:
 - Kahor istaagaysa inay si raaxo leh u xirtaan ama iskaga baxshaan gafuurka xirka
 - Ka hor istaagaysa inay hadlaan markay xiran yihiin gafuur xirka marada ah.
- Dadka qaba xanuunnada neefta ama dhibaataada ku qaba neeftiga
- Dadka uu u sheego khabiir caafimaad, sharci, ama caafimaadka dabeecada inaysan xiran gafuur xirka

Xoorma ayay tahay inaan gafuurka xirto?

Waa inaad xirataa gafuur xirka marada ah marka aad joogto meelaha dadwaynaha ee ay joogaan dadka kale, gaar ahaana gudaha xarumaha.

Uma baahnid inaad gafuur xirka marada ah ku xirato gurigaaga marka aad kaliya la joogto dadka guriga kula dagan, ama markaad kaligaa gaarigaaga saaran tahay. Uma baahnid inaad xirato gafuur xirka marka aad jimicsi ku samaynayso banaanka ee aad aaga banaan ee kugu filan haysato. Waa wax fiican inaad gafuur xirka ku qaadato jeebkaaga si aad u xirato markaad dadka kale u dhawaato.

Sidee ayaan u daryeelayaa gafuur xirkayga?

Dhaq gafuur xirkaaga marada ah mar kasta oo aad isticmaasho, ugu yaraan hal mar maalin kasta. Adeegso saabuunta wasakhda iyo biyo kulul. Si buuxda u qalaji gafuur xirka si buuxda adoo heerka ugu sareeya ku xiraaya qalajiyahaaga. Haddii aadan haysan qalajiye, hawada ku qalaji gafuur xirka adoo meel qoraxdu hayso dhigaaya markaad awoodo. Haddii ay qasab noqoto inaad mar kale isticmaasho gafuur xirkaaga dhaq, farxalo kadib markaad gashato hana taaban wajigaaga.

Iska tuur gafuur xirka:

- Aan mar danbe dabooli karin sankaa iyo afkaaga
- Kala fiday ama ka dhacaaya wajigaaga
- Xarigiisa ama qoolkiisu
- Duleelo ama dilaacyo ku leh marada gafuur xirka ah

Ilo iyo Xog dheeraad ah oo Ku saabsan cudurka COVID-19

- [Faafida Korona Fayras cusub ee 2019 \(COVID-19\) ee WA State Department of Health](#)
- [Gurmadka Gobalka Washington ee Korona Fayras \(COVID-19\)](#)
- [Raadi Waaxda Caafimaadka ee Deegaankaaga ama Degmada](#) (kaliya af Ingiriis)
- [CDC Korona Fayras \(COVID-19\)](#) (luuqadaha qaar)
- [Xiro Gafuur Xirka Marada ah si aad gacan uga Gaysato Yaraynta Faafida COVID-19 \(CDC\)](#) (luuqadaha qaarkood)
- [Sida Loo Fududeeyo Helitaanka, Maas garaati ay adeegsan karaan Dadka Dhagoolka ah \(HSDC\)](#) (kaliya af Ingiriis)

Ma qabtaa su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan cudurka COVID-19? Wac laynkeena tooska ah: **1-800-525-0127**. Si aad u hesho adeegyada turjumaanka, Riix # markay kuu jawaabaan **kadibna dheh Soomaali**. (Wuxuu furan yahay inta u dhaxaysa 6 a.m. illaa 10 p.m.) Wixii su'aalo ah oo la xariira neefsigaaga, baaritaanka cudurka COVID-19, ama natiijooyinka baaritaanka, fadlan la xariir dhakhtarkaaga.

Si aad dukumiintigaan oo qaab kale u ah u dalbato, wac 1-800-525-0127. Macaamiisha dhagoolka ah ama kuwa maqalkoodu culus yahay, fadlan waca 711 ([Washington Relay](#)) ama iimeel udir civil.rights@doh.wa.gov.